


Cudurka Mininjokokal

Warqadda Xaqiiqda



Mininjokokal waa cudur halis ah oo ay keento bakteeriyada *Neisseria meningitidis*. Bakteeriyada waxay sababi kartaa infekshan ku dhaca xuubka maskaxda iyo laf-dhabarta ama infekshanka dhiiga. Marar dhif ah ayay bakteeriyadu keenta oof wareen.




Bakteeriyada waxaa laga helaa sanko iyo cunaha. Dadku waxay bakteeriyada ku faafiyaan candhuufta ama calyada. Waxay qaadataa xiriir dhow ama mid dheer in la faafiyo cudurka.

Calaamadaha iyo Astaamaha



Qandho Sare



Madax xanuun



Qoor Qalafsan



Yalaalugo iyo Matag



Ka cabsashada iftiinka
(Indhaha oo ka falceliya iftiinka)



Wareer

Calaamadaha badanaa waxay bilaabmaan afar maalmood kadib soo-gaadhista bakteeriyada, laakiin waxay u dhaxayn kartaa maalin ilaa toban maalmood.



La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaad haddii aad u malaynaysid inaad qabtid cudurka mininjokokal. Dhakhtarku wuxuu qaadi karaa dhiiga ama dareeraha laf-dhabarka si looga baaro cudurka meningococcal. Antibayootig ayaa loo isticmaali karaa daaweynta cudurkan.

Dadka khatarta badan ugu jira

Qof kasta ayaa qaadi kara cudurka mininjokokal, laakiin waxay ku badan tahay:



Ilmaha yar



Carruurta



Ardayda Kulliyada ee kuwada Nool Qol-jiifka

Dadka kale ee halista ugu jira waxaa ka mid ah dadka leh xaalado caafimaad oo u safra dalalka ka hooseeya Saxaaraha Afrika.

Xiriirada Dhaw



Dadka xiriir dhaw la leh waxay u baahan karaan daaweyn ka-hortag ah. Xiriirka dhaw wuxuu ka koobnaan karaa:

- xubnaha qoyska
- xiriirka saaxiibtinimada aadka u dhaw
- saaxiibka ilmaha ee xannaanada maalinta
- dadka is-dhunkada ama wadaaga cunnooyin ama cabbitaanno.

Antibiyootigyada waa in lagu qaataa 24 saac gudahood laga soo bilaabo markii ugu dambaysay ee kiiska lala xiriiro ama loo qaato sida ugu dhakhsaha badan..

Kahortagga



Tallaalku waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago cudurka mininjokokal. Kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad si aad u hubiso inaad la socoto cusboonaysiinta.

Tallaalladu kama hortagi karaan dhammaan noocyada cudurkan, marka waa muhiim in la joogteeyo caadooyinka caafimaadka leh, sida helitaanka nasasho badan iyo in aan xiriir dhaw lala yeelan dadka buka.

Macluumaad Intaa Ka-badan, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/meningococcal
2. www.cdc.gov/meningococcal

Waxaad ka wici kartaa Maine CDC halkan 1-800-821-5821.